


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Bilowgii murugada
dadka



Waxa qoray: Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus;
Alastair Paterson
Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot; Tammy S.
Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia
Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

BFC
PO Box 3
Winnipeg, MB R3C 2G1
Canada

©2021 Bible for Children, Inc.


Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Ilaah wuxuu abuuray waxwalba.
Markii Ilaah abuuray ninkii ugu
horreeyay oo ahaa Aadan, waxa ay
ninka iyo naagtiisii Xaawa ahaydba
ku wada noolaayeen
Beer Ceeden.




Waxay ahaayeen kuwo
farxad buuxda haysta oo
addeecaya Ilaah kuna faraxsan
la joogitaankiisa ilaa lagasoo
gaadhayay maalin
ka mida maalmaha ...



"Ilaah miyuu idinku yidhi, Waa inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?" Abeesadii ayaa Xaawa weydiisay su'aashan. Waxay iyana ku jawaabtay, "Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa marka laga reebo mid."






"Haddii geedkaas
aannu wax ka cunno
waannu dhiman
doonnaa." Abaasadii
ayaa dabeetana uugu
jawaabtay, "Ma dhiman
doontaan." "Waxa aad
noqon doontaan sida
Ilaah oo kale." Xaawa
waxay doonatay geedkii.
Waxa ay dhegeystay
abeesada oo midhihiina
waxbay ka cuntay.



Markii Xaawa ay caasiday Ilaah
sidoo kalena Aadan ayay ku
sababtay inuu isna midhaha
wax ka cuno. Waxay ahayd
Aadan inuu yidhaahdo,
"Maya! Anigu
ma caasiyi
doono
ereyga
Ilaah."





Markii Aadan iyo
Xaawa ay denbaabeen, labadoodiiba
waxay ogaadeen inay qaawan yihiin. Waxay
isku toleen caleemo berde, waxa ay dabeetana
isku dayeen inay iska qariyaan Ilaah.




Markii maalintu qabowday ayaa Ilaah yimid beerta. Waxa uu ogsoonaa waxa ay Aadan iyo Xaawo sameeyeen. Aadan wuxuu eedeeyay Xaawa. Xaawana waxay eedaysay Abeesada. Ilaahna wuxuu yidhi, "Abeesadu way habaaran tahay. Naagtuna waxay ilmo ku dhali doontaa xanuun."





"Aadanow, maadaama oo aad denbaabtay, dhulku wuu habaabaran yahay oo waxa kaagasoo bixi doona qodxan iyo yamaarug. Waad dhididi doontaa oo dhibaatoon doontaa si aad wax uugala soo baxdo."





Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa
ka saaray beertii cajiibka
ahayd. Waayo waa ay
denbaabeen, waxaana
laga soocay
Ilaaha
nolosha
bixiya!







Ilaah

wuxuu sameeyay seef ololaysa
si ay bannaanka usii ahaadaan.
Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa
dhar uuga dhigay hargo.

Xaggee Ilaah
haddaba ka
keenay
hargaha?




Markii ay qoska noqdeen ee ilmo u dhashay Aadan iyo Xaawa, ilomohoodii ugu horreeyay wuxuu ahaa Qaabiil oo beer falato ah. Ilmohoodii labaad oo ahaa Haabiil, waxa uu isna ahaa adhi jire.



Maalin maalmaha ka mida ayaa Qaabiil wuxuu Ilaah u bixiyay xoogaa khudaar ah. Haabiilna waxa uu Ilaah qurbaan ahaan uugu bixiyay mid ka mida adhigiisa kuwa uugu fiican. Ilaahna wuxuu ku farxay hadiyadda Haabiil.



Ilaah kumuu farxin hadiyaddii
ama qurbaankii Qaabiil. Dabeeto
Qaabiilna wuu cadhooday. Laakiin
Ilaah wuxuu isaga ku yidhi,
"Haddaad wax wanaagsan
samaysid, sow laguma
aqbaleen?"



Qaabiil cadhadiisii kama ayna
dhammaanin. Wakhti dabadiisna
waxa uu weeraray walaalkiis
Haabiil oo waanu dilay isaga.




Ilaah wuxuu la hadlay Qaabiil isagoo ku leh,
"Walaalkaa Haabiil meeh?" isna waxa uu
ku jawaabay, "Ma aqaan: ma anigaa ah
walaalkay ilaaliyihiisa?" Ilaah waxa
uu dabeetana isaga ku ciqaabay in
aanu awood u yeelan doonin inuu
dhulka beerto oo uu noqon doono
mid carcarara.




Qaabiil waxa uu ka tegay Ilaah. Waxa uu dabeetana guursaday gabadhii ay dhaleen Aadan iyo Xaawa, waxaanay noqdeen qoys. Si dhakhso ahna, Qaabiil carruurtuu awowga u ahaa iyo kuwaasi kuwii ay sii


dhaleeni
waxa ay
buuxiyeen
magaaladii la
asaasay.




Sidoo kalena, goyskii Aadan iyo
Xaawa si dhakhso ah ayay u koreen.
Wakhtigaas isaga ahna dadku waxa
ay noolaan jeer cimri dheer.





Markii wiilkeedii Seet dhashay, Xaawo waxay tidhi,
"Ilaah abuur kaluu ii soo dhigay Haabiil
meeshiisii." Seedna waxa uu ahaa nin xaq
ah oo wuxuu noolaa 912 sanadood isagoo
carruur bandanna dhalay.




Dunida dhexdeeda, dadkii waxa ay noqdeen kuwo marba marka ka danbaysa sii xumaada oo facba faca kaluu raacay. Ugu danbayntii, Ilaah inuu baabi'iyoy aadanaha ...



... dugaagga oo dhan iyo
shimbiraha. Ilaah waxa uu ka
caloolxumaaday inuu abuuray
dadka. Laakiinse nin qudha
ayaa Ilaah raalli
geliyay ...



Ninkani waxa uu ahaa Nuux.
Waxa uu ahaa farcankii
Seet, oo Nuuxna waxa
uu ahaa nin xaq ah.
Waxa uu ahaa mid
ku xidhan
Ilaah.



Sidoo kale saddexdiisii wiil ee uu
dhalay waxa uu baray inay Ilaah
addeecaan. Imika haddaba Ilaah
wuxuu qorsheeyay inuu Nuux
u adeegsado si
gaar ah oo
cajiib leh!



Bilowgii murugada dadka


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 3-6

“Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa.” Sabuurka 119:130






Dhammaad



2



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

